This VIS translation is out of date. When you give your patient this translation, also give them the up-to-date English version of it.
To get both, and to find out what was updated, go to www.immunize.org/vis

# TALLAALKA FAYRUSKA NOOL EE HARGABKA EE SANKA LAGA QAATO 2010-11

## WAXA AAD U BAAHAN TAHAY IN AAD OGAATO

Warbixinta Macluumaadka Tallaalka ayaa la helayaa oo ku qoran luqadda Isbaanishka iyo luqado kale. Waxaad eegtaa www.immunize.org/vis
Hojas de Informacián Sobre Vacunas están disponibles en Español y en muchos otros idiomas. Visite www.immunize.org/vis

## 1 Waa maxay sababta la isu tallaalayo?

**Hargabka ("flu") waa cudur aad la isugu gudbiyo.**

Waxaa keena fayruska loo yaqaan influenza, kaasoo la isugu faafiyo qufaca, hindhisyada, ama dheecaanka sanka ka socda.

Cid kasta ayuu ku dhici karaa hargabka, hase ahaatee heerka infakshanka wuxuu ku badan yahay carruurta. Dadka badankiis, waxay calaamaduhu socdaan dhowr maalmood. Waxaa ka mid ah:

- xummad
- xanuunka dhuunta
- dhaxan
- daal
- qufac
- madax xanuun
- murqo xanuun

Waxaa suuragal ah in xanuunada kale ay qabaan calaamado la nooc ah oo caadi ahaan lagu qaldo hargabka.

Carruurta yar, dadka waayeelka ah, haweenka uurka leh, iyo dadka qaba xaaladaha caafimaad qaarkooda – sida cudurrada wadnaha, sambabaha ama kilyaha ama marka difaaca jirku yar yahay – aad ayeey ugu xanuunsan karaan. Hargabka wuxuu keeni karaa xumaad/feebaro badan iyo wareento, kaasoo uga sii dari kara xaaldaha caafimaad ee uu qofku qabo. Wuxuu carruurta u keeni karaa shuban iyo qalal. Sanad waliba kumanaan qof ayaa u dhinta hargabka xilliyada iyadoo ka intaa in ka badan u baahdaan in isbitaal la geeyo.

Haddii la iska tallaalo waxaad ka badbaadi kartaa hargabka sidoo kale waxaad ka fogaan kartaa in aad hargabka dadka kale qaadsiiso.

## 2 Tallaalka fayruska nool ee hargabka ee dhibaatadiisa la dhimay – LAIV (buufiyaha sanka)

Waxaa jiraan laba nooc oo ah tallaalka sanka:

1. **Tallaalka fayruska nool ee hargabka ee dhibaatadiisa la dhimay** waxaa ku jira fayruska hargabka (oo daciif laga dhigay) oo nool balse dhibaatadiisa la dhimay. Waxaa lagu buufiyaa daloolada sanka.
2. Tallaalka fayruska aan nooleyn (la dilay) ee hargabka, ama "tallaalka hargabka (flu shot)," waxaa laga qaataa marka irbad lagu duro murqaha. Waxaa tallaalkan lagu sharrixi doonaa mid kale oo ah Warbixinta Macluumaadka Tallaalka.

Fayrusyada hargabka marwalba waa ay isbeddelaan, sidaa darteed waxaa dadka lagu dhiirigeliyaa in ay sanad walba tallaal qaataan. Sanad walba saynis yaqaanada waxay isku dayaan in ay isu barbar dhigaan fayrusyada ku jira tallaalka si uu u noqdo midka ugu dhow kan sanadkaasi keenay hargabka.

Tallaalka hargabka 2010 – 2011 wuxuu dadka ka difaacaa hargabka A/H1N1 (faafa) iyo fayrusyada kale ee hargabka– A/H3N2 iyo hargabka 'influenza B'. Dadka kama uu difaacyo cudurrada ay keenaan fayrusyada kale.

Waxay qaadanaysaa illaa 2 asbuuc tallaalka kaddib si difaacu uu u dhismo. Wuxuu difaaca soconayaa qiyaastii illaa hal sano.

LAIV ma uu ku jiro thimerosal ama waxyaabaha kale ay ku jiraan kiimikada alaabta cimrigoodu lagu dheereeyo.

## 3 Yaa la siin karaa LAIV?

LAIV waxaa lagu dhiirigeliyaa dadka caafimaadka qaba ay da'doodu u dhexeyso **2 illaa 49 sano**, oo aan lahayn uur iyo xaalado caafimaad qaarkood (waxaad eegtaa #4, hoos).

Dadka 2009 la siiiyay tallaalka hargabka H1N1 (faafa), ama hargabka faafa ee gudihii 2009, waa in ay markale la siiyo tallaalka hargabka xilliyada ee 2010-2011.

## 4 Dadka qaarkood ma aha in la siiyo LAIV

LAIV laguma dhiirigeliyo cid walba. Dadka soo socda waa in la siiyo tallaalka fayruska aan nooleyn (flu shot):

- **Dadka waayeelka ah ee jira 50 sano ama ka badan ama carruurta ay da'doodu u dhexeyso 6 illaa 23 bilood.** (Carruurta ka yar 6 bilood ma aha in la siiyo tallaalka hargabka midkuu doono ha noqdo.)
- Carruurta ay da'doodu ka yar tahay 5 sano oo qaba neefta ama uu ku dhacay hinraagid mar ama ka badan sanadkii la soo dhaafay.
- Haweenka uurka leh.
- Dadka qaba xaaladaha caafimaadka daba dheeraada ee:
  - xanuunka wadnaha
  - xanuunka kilyaha ama beerka
  - xanuunka sambabaha
  - neefta
  - xanuunada dheefshiidka, sida macaanka
  - dhiig yar (aniimiya), iyo dhibaatooyinka dhiigga
- Dadka qaba xanuunada murqaha iyo neerfooyinka (sida qalalka ama baraaliska) ee keeni kara dhibaatooyinka xanuunka ama liqidda.
- Qof kasta oo uu difaaca dhiiggiisu yar yahay.
- Qof kasta oo ka ag dhow qof difaaciisu yar yahay kaasoo u baahan in lagu daryeelo bey'ad badbaadsan (sida xarunta tallaalka dhuuxa lafta). *Marka laga ag dhaw yahay dadka uu ku yar yahay difaaca jidhkooda (sida dadka qaba HIV) waxaa la siin karaa LAIV. Shaqaalaha caafimaadka ka tirsan qaybaha daryeelka degdegga ah ee carruurta cusub ama bukaan socod eegyada burada (oncology clinics) waxaa la siin karaa LAIV.*
- Carruurta yar ama kuwa qaangaar ku dhow oo loogu talagalay in aasbiriin la siiyo muddo fog.

Waxaad u sheegtaa takhtarkaaga haddii aad qabto xajiinta/aleerjiyada (qatarta ku ah nolosha). Xajiinta aad ka qaadi kaarto tallaalka hargabka waa mid aad u yar.

- Fayruska tallaalka hargabka waxaa lagu koriyaa ukumo. Dadka qaba **xajiinta/aleerjiyada ukunta ee xun** ma aha in la siiyo tallaalka.
- Xajiinta/aleerjiyada xun ee laga qaadi karo qayb kasta oo tallaalka ka tirsan ayaa sabab u ah in aan tallaalka la qaadan.
- Haddii ay dhibaato culus kula soo gudboonaato marka aad qaadato tallaalka hargabka, waxaad la socodsiisaa takhtarkaaga.

This VIS translation is out of date. When you give your patient this translation, also give them the up-to-date English version of it. To get both, and to find out what was updated, go to www.immunize.org/vis

Waxaad takhtarkaaga u sheegtaa haddii uu hore kugu dhacay Guillain-Barré Syndrome (xanuun daran oo baraalis leh, oo sidoo kale loo yaqaan GBS). Wuxuu takhtarkaaga kaa caawinayaa go'aanka la xiriira in aad tallaalka qaadan karto.

Waxaad u sheegtaa takhtarkaaga haddii lagu siiyay wax tallaal ah 4-tii asbuuc ee la soo dhaafay.

Qof kasta oo qaba xaalad sanka la xiriirta oo u keeni karta dhibaato xagga neefta ah, sida sanka aad u xiran, waa in uu qaato tallaalka hargabka ee irbadda.

Dadka yar xanuunsan ama aad u xanuunsan waa in ay caadi ahaan sugaan illaa ay ka soo kabsanayaan inta aan la siin tallaalka hargabka. Haddii aad xanuunsan tahay, waxaad kala hadashaa takhtarkaaga haddii aad qabsanayso ballan kale oo tallaal ah. Dadka xanuunkoodu yar yahay caadi ahaan waa la tallaali karaa.

## 5 Goorma ayeey tahay in aan qaato tallaalka hargabka?

Tallaalka hargabka la qaato islamarka la heli karo wuxuu difaac u yahay hargabka xilliyada haddii uu dhaqsi yimaad. Waxaad is tallaali kartaa inta uu xanuunka ku jiro deegaankaaga.

Hargabka wuxuu imaan karaa xilli kasta, hase ahaatee hargabka badankiisa wuxuu yimaad inta u dhexeysa Nofeembar illaa Maajo. Xilliyadii dhawaan la soo dhaafay, wuxuu xanuunka u badnaa Janaayo iyo Febaraayo. Tallaalka la qaato Diseembar, ama wixii ka dambeeya, faa'ido ayuu leeyahay sanooyinka badankood.

Dadka waayeelka ah iyo carruurta koreysa waxay u baahan yihiin hal tallaalka hargabka ah sanad walba. Balse carruurta ay da'doodu ka yar tahay 9 sano waxay qaarkood u baahan yihiin laba tallaal si ay isaga difaacaan. Waxaad weydiisaa takhtarkaaga caafimaadka.

Tallaalka hargabka ayaa la qaadan karaa isla waqtiga la qaadanayo tallaalada kale.

## 6 Waa maxay khatarta ka imaan karta LAIV

Tallaalka, sida daawooyinka kale, wuxuu keeni karaa dhibaato badan, sida xajiin/aleerjiyo daran. Khatarta uu tallaalka ku keeni karo dhibaato culus, ama geeri, aad ayeey u yar tahay.

Fayrusyada nool ee tallaalka hargabka aad ayeey u yar tahay in ay dadku kala qaadaan. Xittaa haddii ay dhacdo, waxay u badan tahay in aaney xanuun keenin.

LAIV waxaa laga sameeyaa fayrus daciif laga dhigay mana uu keeno hargab. Dadka tallaalka qaata ayaa suuragal ah in ay isku arkaan calaamado fudud (waxaad eegtaa halka hoose).

**Dhibaatooyin fudud:**
Qaar ka mid ah carruurta yar iyo kuwa qaangaarka ah oo ay da'doodu u dhexeyso 2-17 sano waxay soo sheegeen:

- sanka oo dareera, sanka oo xirma ama qufac
- xummad
- madax iyo murqo xanuun
- hinraagid
- Xanuunka caloosha ama matag ama shuban marmar ah

Dadka weyn ay da'doodu u dhexeyso 18-49 waxay soo sheegeen:

- sanka oo dareera ama sanka oo xirma
- xanuunka dhuunta
- qufac, dhaxan, daal/daciifnimo
- madax xanuun

**Dhibaatooyinka daran:**

- Xajiinta/aleerjiyada khatarta ku ah nolosha ee laga qaado tallaalka aad ayeey u yar tahay. Haddii ay dhacdo, caadi ahaan waxay dhacdaa dhowr daqiiqo illaa dhowr saacadood tallaalka kaddib.
- Haddii uu shey keeno waxyeellada aan caadiga ahayn, lama ogaan karo illaa kumanaan, ama dhowr milyan oo qof ay ka isticmalaan. Dhowr milyan oo ah tallaalka LAIV ayaa dadka la siiyay tan iyo markii la sharciyeeyay, sidaa darteed tallaalka laguma tilmaamin dhibaatooyin lixaad leh.

Waxaa marwalba kormeer lagu hayay badbaadada tallaalku leeyahay. Si aad macluumaad dheeraad ah u heshid, waxaad eegtaa:

**www.cdc.gov/vaccinesafety/Vaccine_Monitoring/Index.html**
iyo
**www.cdc.gov/vaccinesafety/Activities/Activities_Index.html**

## 7 Maxaa dhacaya haddii ay waxyeello ka yimaadiin?

### Waa maxay waxa aan eegayo?

Xaalad kasta oo aan caadi ahayn, sida xummad badan ama dhaqanka isbeddela. Calaamadaha waxyeelada xajiinta/aleerjiyada daran waxaa ka mid ah neefsashada adag, xabeeb ama hinraagid, barar, midabka aan dhalaalayn, wadne garaac badan ama dawakhsanaan.

### Maxaan sameeynayaa?

- **Waxaad wacdaa takhtarka,** ama waxaad qofka islamarkiiba geysaa takhtarka.
- **Waxaad u sheegtaa** takhtarka waxa dhacay, taariikhda iyo saacadda ay dhacday, iyo marka tallaalka la qaatay.
- **Waxaad takhtarka** ka codsataa in uu warbixin ka gudbiyo waxyeelada isagoo foomka Nidaamka Warbixinta Dhacdada Waxyeelada Tallaalka (Vaccine Adverse Event Reporting System - VAERS). Ama waxaad warbixintan u gudbin kartaa VAERS adigoo tagaya bogga internetka www.vaers.hhs.gov, ama wacaya **1-800-822-7967.**

VAERS ma ay bixiyaan talo caafimaad.

## 8 Barnaamijka Qaranka ee Abaalmarinta Dhaawaca Tallaalka

Barnaamijka Qaranka ee Abaalmarinta Dhaawaca Tallaalka (VICP) waxaa la aasaasay 1986-dii.

Dadka filaya in uu dhaawac ka soo gaaray tallaal waxay barnaamijka wax ka ogaan karaan iyagoo codsi soo gudbinaya oo wacaya taleefoonka **1-800-338-2382,** ama booqanaya bogga internetka ee VICP **www.hrsa.gov/vaccinecompensation.**

## 9 Sideen wax dheeraad ah uga ogaan karnaa?

- Waxaad weydiisaa takhtarkaaga caafimaadka. Waxay ku siin karaan xirmada tallaalka ama kugula talin karaan ilo kale aad macluumaad ka heli kartid.
- Waxaad wacdaa waaxda caafimaadka deegaankaaga ama gobolka.
- Waxaad la xiriirtaa Xarumaha Ka-Hortagga iyo Maamulka Cudurrada (CDC):
  - Waxaad wacdaa **1-800-232-4636 (1-800-CDC-INFO)** ama
  - Waxaad booqataa bogga internetka ee CDC **www.cdc.gov/flu**

DEPARTMENT OF HEALTH AND HUMAN SERVICES
Centers for Disease Control and Prevention

Vaccine Information Statement (Interim)
Live, Attenuated Influenza Vaccine - Somali (8/10/10) U.S.C. §300aa-26
Translated by the Oregon Immunization Program